OREGON DEPARTMENT OF
Human Services

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) waa hay'ada wax hoggaamisa ee Oregon oo ka caawisa dadka ku nool Oregon in ay gaaraan fayo-qab iyo madax banaani.

Adeegyadayada waxaa mid ah

Dadka Waayeelka ah ee Naafada ah

Waxaan bixinaa adeegyo loogu talagalay dadka waaweyn iyo dadka waaweyn ee naafada ah. Adeegyadayada waxaa ka mid ah caawimaada guriga ama bulshada dhexdeeda ah, adeegyada daryeelka muddada fog ee Medicaid, taageerada dhanka guryaha, barnaamijyada cuntada, caawimaada shaqada, iyo macluumaadka ilaha.

- **Adeegyada Badbaadinta Dadka Waaweyn:** Baaritaanka iyo ka hortagga xadgudubka si dadka looga ilaaliyo in ay dhibaato soo gaarto.
- **Isku xirnaanshaha Ilaha Dadka Waaweyn iyo Naafada (ADRC) ee Oregon:** Ka caawinta dadka ee in ay ogaadaan fursadaha daryeelka muddada fog iyo bixinta macluumaadka ilaha iyo is gudbinta. Si aad ula xiriirto ARDC degaanka, wac **855-ORE-ADRC (855-673-2372).**
- Iska caawinta codsashada adeegyada Medicaid.
- Caawimaad lacag la'aan ah oo la adeegsanayo Barnaamijka Taageerada Faa'iidooyinka Caymiska Caafimaad ee Dadka Waayeelka ah (SHIBA). Wac **800-722-4134.**
- Ilaha loogu talagalay dadka uu soo gaaray dhaawac maskaxeed. Wac **833-685-0848.**
- Ilaha loogu talagalay Dadka dhagaha la, Dhagaha/Indhaha la' ee Maqalku Ku adag yahay. Email-ka odhs.info@odhs.oregon.gov.

Isku-Filnaanshaha

Waxaan dadka ka caawinaa in ay helaan lacag caddaan ah, cunto, iyo taageero kale si loo daboolo baahiyahooda una gaaraan fayo-qabkooda.

- **Gargaarada Cuntada:** Barnaamijka Gargaarada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP) wuxuu cunto caafimaad leh saaraa miiskaaga korkiisa. Sidoo kale tababar, ilo iyo taageero si loo helo loona sii hayso shaqooyinka.
- **Taageerada Lacageed:** Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF), Qoxootiga (REF-Cash) iyo Qorshaha Badbaadada ee Gargaarka ku Meel Gaarka ah ee Dadka ka Badbaaday Rabshadaha Qoyska (TA-DVS) waxay taageeraan baahiyaha aasaasiga ah iyo badbaadada.

Maareynta Wax u adkeysiga iyo Xaalada Degdega ah

Waxaan dadka iyo bulshooyinka ka caawinaa in ay badbaado ku sugnaadaan iyada oo diiradda la saarayo dadka iyo nidaamyada taageera iyaga, ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib musiibooyinka.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. Waaxda Isgaarsiinta kala xiriir communications.odhs@odhs.oregon.gov ama 503-945-5600. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

100-1619300 (04.2025) Somali

Tababarka Dhaqancelinta

Waxaan dadka qaba naafanimada nooc kasta ka caawinaa in ay helaan oo haysaan shaqooyinka oo horumariyaan xirfadahooda shaqo. Taageerada waxaa ka mid ah la-talinta xirfadeed, waxbarashada, tababarka, tiknoolajiyada la adeegsado, isku diyaarinta wareysiyada shaqada, iyo waxyaabo badan.

- **Adeegyada Dhallinyarada:** Caawimaada dadka dhallinyarada ee naafada ah ee da'doodu tahay 14 ilaa 24 jir ee in ay helaan xirfado shaqo oo raadsadaan xirfado shaqo.
- **Ilaha Ganacsiga:** Ku xirka shaqo-bixiyayaasha ee shaqo raadiyayaasha u qalma, hore loo sii baaray "prescreened' ee diyaarka u ah in ay shaqeeyaan.

Adeegyada Naafanimada Koriinka

Waxaan bixinaa adeegyo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka. Taageerooyinkan muddada dheer waxay daboolaan baahiyaha qof kasta si ay ugu noolaan karaan nolosha ay rabaan bulshadooda.

- **Adeegyada Goobaha la degan yahay:** Goobaha taageerada oo 24 saacadood ah iyo guryaha ka baxsan guriga qofka ama ka qoyska.
- **Adeegyada Shaqada:** Taageero si loo helo oo loogu guuleysto shaqo iyo ka qayb qaadashada bulshada qofka.
- **Adeegyada Guriga-dhexdiisa:** Taageero si loogu noolaado guri u gaar ah qofka ama guriga qoyska.
- **Ruqsad bixinta Guriga Wax lagu korsado:** Caawimaada dadka ee sidii ay u noqon lahaayeen bixiyayaasha Guriga Wax lagu korsado oo ruqsad haysta oo loogu talagalay dadka waaweyn ama carruurta.

- **Adeegyada Kale:** Qalabka iyo tiknoolajiyada la adeegsado, taageerada hab-dhaqanka, kalkaalisanimada, gaadiidka, wax ka beddelka guriga iyo baabuurka, tababarka qoyska iyo waxyaabo badan.

Daryeelka Carruurta

Waxaan ka caawinaaa carruurta iyo qoysaska sidii ay ugu noolaadaan lahaayeen nolol ammaan ah, degan oo caafimaad leh. Waxaan qayb ka nahay nidaamka gobolka oo dhan oo taageera carruurta, qoysaska, iyo bulshooyinka. Waxaan sidoo kale la shaqeynaa Sagaalka Qabiil ee Oregon iyo qomwiyadaha Qabiilka ee kale si loo raaco Xeerka Daryeelka Carruurta Hindida Maraykanka ee Oregon.

- **Khadka tooska ah ee Xadgudubka Carruurta ee Oregon:** Qiimeynta halista badbaado ee ilmaha iyo baahiyaha loo qabo adeegyada.
- **Badbaadada Ilmaha:** Caawimaada carruurta ee in ay ammaan ku haystaan guryahooda.
- **Dib u midoobida:** Dib ula middeynta carruurta ee qoysaskooda.
- **Wax korsashada:** Taageerada wax korsashada marka carruurtu aysan ku soo laaban karin guriga.
- **Daryeelka ilaha (ilme korsiga):** Bixinta meelaynta ku meel gaarka ah ee ilmaha ku jira daryeelka ilaha.

Siyaabaha aad nagula soo xiriiri karto

Booqo website-kayaga ee oregon.gov/odhs ama iskaan garee code-ka QR.

Wixii la xiriira caafimaadka, cuntada, lacagta caddaanka ah iyo daryeelka caruurta booqo benefits.oregon.gov, iskaan garee code-ka QR, ama Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE ka wac **800-699-9075.**

Si aad u soo sheegto xadgudub ama dayacaad loo geystay ilme ama qof weyn oo ku nool Oregon, wac **855-503-SAFE (7233).**

Nagala soco jaanaladayada warbaahinta bulshada

- **Facebook -** @ORHumanServices
- **Instagram -** @ORHumanServices
- **YouTube -** @ORGovDHS